IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMI AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad — Muqdisho, 1 Nofember 1977 L. 11

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 66 ee 7 Sebt. 77, Sharciga Xuquuqda Qoraalka (Copy Right Law).- Bogga 1107

SHARCI L. 67 ee 12 Okt. 77, Meel Marin Heshiis Amaahda ee dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumamarinta Afrika.- » 1141

LAW. N°. 67 on Oct. 77, The Loan Agreement between the Somali Democratic Rep. and the African Development Fund.- » 1142

SHARCI L. 68 ee 17 Okt. 77, Baabi'inta Sharci lam. 11 ee soo baxay 5tii Oktoobar 1976 ee lagu Mideeyey Warshadda Hilibka ee Kismaayo iyo Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (L.D.A.). » 1143

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho

BOGGA LABAAD

XEER

XEER WASAARADDA XOOLAHA DHIRTA IYO DAAQA, 5 Okt. 77, Wax ka Beddelid Sicirka iib. ka daawada Xoolaha ee ku qoran Lifaaqa «B» Lam. 6aad iyo kan 7aad ee Sharciga Lam. yahay 30 soona baxay 6dii Maarso 1976.- L. 89 » 1145

BOGGA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN IYO WIXII LA MID AH.-

OGEYSIIS FADHI CAADI AH » 1147



BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 66 ee 7 Setember 1977, Sharciga Xuquuqda qoraaga (Cipy Right Law).

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY: Xaashida 2aad ee Kacaanka;
ISAGOO AQOONSADAY: Baahida loi qabo in shirci loo dejiyo dhowridda xuquuqda qoraaga;
ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada;

WUXUU SOO SAARAY

SHARCIGA SOO SOCDA:

QAYBTA I

HAWLAHA LA DHAWRAYO

Qod. 1aad
Qeexid iyo Macnayn

1) Haddii aan si kale loo macnayn, ereyada iyo odhaahyada sharcigan iyo xeernidaamiyaha la xiriiraa waa sida hoos ku cad:

«WASIIRKA» Waa Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

«DAWLADDA» Waa: Dawladda Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya oo ay weheshaan: Wasaaradaha, Waaxaha, Dawladda Hoose, Hay'adaha Madaxa Bannaan iyo xubin kastoo ka mid ah Laamaha Dawladda.

«QORE» Waa: Abuuraha ama tarjumaha hawl indheer garadnimo leh, ama ku habaysan Suugaanta iyo dhaqanka Soomaaliyeed nooc kas taba ha ahaatee.

«HAWL» Waa: hawl indheergaranimo leh ama si sugan loo dheegtay oo uu abuuray ama tarjumay qoruhu.

«HAWL QOFKA KELIYA» Waa: Hawsha uu dhaliyo qof keli ah.

«HAWSHA loo wadajiro» Waa: Hawsha ay wadajir ahaan u dhaliyaan ama u tarjumaan laba qof ama in ka badani oo aan iskaalmeysigooda ama u tarjumaan laba qof ama in ka badani oo aan iskaalmaysigioda la kala reebi karayn.

«HAWSHA GUUD» Waa: Hawsha dadweynaha loo soo bandhigo.

«HAWSHA ASALKA AH» Waa: Curadnimada abuurista indeergaradka ah.

«HAWSHA DHEEGASHADA AH» Waa: Hawsha aan asalka ahayn, laakiin haddii hawl asal ah la soo qaato, la tarjumo ama si kale loo baddelo, iyadoo si xor ah isu taageysa.

«FIDIN» (Publication) Waa: Dhab ahaan qoridda hawsha iyo u soo bandhigidda dadweynaha, nuqullo la akhristo ama maqal iyo muuqaalba ha aheedeen eh.

Qod. 2aad

## HAWLAHA IYO XUQUUQDA LA DHAWRO

Sharcigani wuxuu dhawrayaa xuquuqda hawlaha suugaanta, fanka, farshaxannimada iyo cilmiga ee ay si sharci ah qorayaashu maankooda uga dhaliyaan.

Dhawriddani waxay gaar ahaan ku fidsan tahay:

i) Buugagga, (yar iyo weyn) maqaaladaha iyo qoraallada jaad iyo qaab kastaba leh, sida qaamuusyada, oo ay ka mid yihiin (encyclopedia), iyo waxyaalaha kalee la uruuriyo nooc kastaba ha ahaadeen eh.

ii) Suugaanta aan qornayn, hawlaha farshaxannimada iyo fanka.

iii) Khudbadaha, casharradda, faallooyinka iyo hawlaha kale ee la mid ah.

iv) Hawlaha ruwaayadaha, qoran ama duuban ama afti ah (oral) muusiiqada iyo guud ahaan hawlaha masraxa oo dhan.

v) Soo baahin kasta oo suugaan ah oo loo qaato raadiyaha ama talefishanka, iyo hawlaha kale ee asal ahaan loo sameeyey raadiyaha ama taleefishinka.

iv) Jaraa'idka, iyo maqaaladaha oo si sharci ah u daabacan.

iiv) Musawirrada, iyo alaabta xardhan ama naqshadaysan.

xi) Ururinta suugaanta iyo hawlaha cilmiga ah iyo tarjamadaan.

ix) Hawlaha cinjirka ah (plastic) ee juqraafiga la xiriira, kharii. ddadaha, (topography), q alabka muuqaal-maqalka (audio-visual); iyo hawlaha kale ee aqoonta la xiriira.

x) Hawlaha sinimaha (cinematographic);

xi) Qorshaha dhismaha iyo sawir-gacmeedka la xiriira (Sketches and Drawings).

xii) Aslidda ama sawir-gacmeedka (painting), sawir tilmaameedka (illustrations) iyo wixii la nooc ah.

xiii) Qoridda (sculptures) iyo hawlaha kale, ee la midka ah.

xiv) Ka qaadashada, tarjumada iyo baddelaadda kale, markii uu oggolaado qoraha hawsha asalka ah lihi, waxaase shardi ah inaan hawsha asalka ahi ka mid ahayn laamaha dhaqanka dadweynaha.

Qod. 3aad

## MAGACA HAWSHA

1) Sharcigani hawsha uu dhawrayo, wuxuu si le'eg u dhawrayaa magaca qoraha oo ah qayb hawsha ka mid ah; waana in had iyo jeer lala xusaa magaca qoraha mar kastoo hawsha la isticmaalayo, qoraal iyo aftiba.



Waa inaan hawsha magaceeda la isticmaalin haddii au isticmaalkeeni karo murug iyo muran.

Qod. 4aad

## HAWLAHA DHEEGASHADA AH

1) Hawlaha soo socda waxa loo dhowrayaa si ka duwan hawlihii laga dheegtay haddii habka loo ururiyey ama loo isticmaalay ay ka dhexmuuqanayso hawshii asalka ahayd;

2) Tarjumada, ka qaadashada, soo koobidda iyo baddellaadda kale ee suugaanta, fanka iyo hawlaha cilmiga ah.

ii) Ururinta suugaanta, fanka iyo hawlaha cilmiga ah sida qaamuuska, ururinta hawlaha maansooyinka iwm.

iii) Hawlaha lug ku leh hiddaha iyo dhaqanka.

QODDOBKA 5aad

Hawlaha aan la dhawrayn.

Hawlaha aan la socon sharciyadda ee ku xusan qoddobyada 1aad, iyo 2aad, ee sharcigan xuquuqda qoruhu kuma dhawrana arrimaha soo socda:

i) Sharciyada iyo xeerarka Dawladda,

ii) Ogeysiisyada amar siin, wareegtooyin digniin ah iyo wixii la mid ah, kaasoo ka soo baxa xubnaha dawladda ama hay'addaha madaxabannaan iyo tarjumadda rasmiga ah ee la xiriirta ogeysiisyadaas amar siintaas iyo wareegtooyinkaas digniinta ah.

iii) Khudbadaha siyaasiga ah iyo khudbadaha ay qareennadu maxkamadaha ka akhriyaan iyo tarjumada rasmiga ah ee khudbadahaas.

iv) Garsoorid, go'aanno amarro, xukummo iyo dakreetooyinka sharciga Maxkamadaha iyo go'aammada ay gaaraan xubnaha maamulka dawladdu.

v) Wararka maalin walba Idaacadda laga sii daayo, ee dadweynaha loo baahiyo.

## QAYBTA 2aad

## XUQUUQDA QORAHA IYO QOFKA YEELAN KARA

### QODDOBKA 6aad

### Xuquuqda Qoraha

Xuquuqda qoruhu waa lahaansho la mid ah waxyaalaha kale ee la leeyahay, lana ictiraafo, isla markaasna lagu dhawro sharciga madaniga ah ee lagaga dhaqmo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, wuxuuna ka kooban yahay xuquuq dhaqaale iyo mid xushmo.

### QODDOBKA 7aad

### Qofka yeelan kara Xuquuqda Qoraha

1) Xuquuqda qoraha, waa wax iska leh qoraha iyo dadka dhaxalkiisa leh. Qoruhu waa inuu ahaadaa mid wax uu qoray loo aqoonsan yahay, haddii aaney jirin wax taas ka soo horjeeda. Haddii uu muran ka aloosmo xuquuqda qoraaga, arrintuna ay Maxkamad hor tagto, Xukunka Maxkamadda ku shaqada leh ayaa noqonaya go'aanka kama dambaysta ah.

2) Qorayaasha wadajir ahaan hawl u qabtaa waa u siman yihiin xuquuqda qoraha.

3) Qorayaasha hawl isku biirsada, haddii la kala qaadana qiimaha hawsha hoos u rideyaa, marka sharcigan loo eego waxay noqonayaan isku xuquuq.

4) Dadka xuquuqda noocaas ah ku yeelan kara hadiyeyn, iibsasho ama ijaarasho waa la dhawrayaa xuquuqda qoraha.

5) Marka qoraha hawshiisa la daabaco waxa loo dhawrayaa xuquuqda uu ku yeesho heshiiska daabacadda iyo xuquuqda kalee ee hore u xusan.

6) Haddii qoraagu uu hawl abuuro isagoo heshiis kula jira dawladda ama Hay'ad madax bannaan, ama hawshaas uu abuuray ay ka mid tahay hawlihiisa caadiga ah, xuquuqda qoraha ee hawsha jaadkaas ah way lumaysaa haddii aanay jirin wax cad oo taas ka soo horjeeda, xuquuqdana waxa yeelanaya hay'adda uu markaas u shaqeenaayey.
Iyadoo la tixgelinayo:

a) Haddii aanu jirin heshiis cad oo tilmaamaya lahaanshaha xuquuqda hawshaas la qabtay;

b) Xuquuqda ay hay'addu (iwm) ku yeelato hawsha lagu qabtay heshiiskaas way ka baxsan tahay hawsha caadiga ah ee qoraha lagu la heshiiyey.



c) Hay'addu xaq uma laha in ay cid saddexaad u gudbiso xuquuqda qoraha ee uu sidaas ku helay cid haddii aanay ku dhisnayn dan çaran.

j) Qaybta (6aad) ee qodobkan ayaa lagu dhaqmayaa markii uu qoruhu khidmad la siiyo uu howl ku abuuro, hay'addii khidmadda siiseyna ay u ballan qaado innay lacagta lagu heshiiyey bixiso.

### Qod. 8aad

### Heshiisyada Xuquuqda Qoraha Waxyeellaynaya

1) Hawlaha aan la socon qodobada 88 iyo 89 ee sharciga madaniga ah ee Soomaaliyeed (Somali Civil Code) heshiis kasta oo xuquuqda qoraha waxyeellaynaysa wuxuu ahaanayaa mid qoran.

2) raad ma laha heshiis kasta oo aan qornayn, oo la xiriira xuquuqda qoraha.

## Qaybta IIIaad

### Qorayaasha Xuquuqdooda la Dhawrayo

### Qod. 9aad

### Qorayaasha Soomaaliyeed

1) Qoraa kasta oo Soomaali ah xuquuqdiisa waxa lagu dhawrayaa sharcigan, iyadoon loo eegin:-

a) In hawshiisu ku abuurantay ama lagu daabacay dalka gudihiisa ama dibadda;

b) Hawshiisa hala daabaco ama yaan la daabicin, waxa u shardi ah inuu u hoggaansan yahay shuruudaha sharcigani uu ku ilaalinayo xuquuqda qoraha.

t) Hawsha qoraaga Soomaaliyeed ha ku qornaato af-Soomaali, Carabi ama afaf Kaleba

### Qod. 10aad

### QORAYAASHA AAN SOOMAALIDA AHAYN

1) Qoraaga shisheeyaha ah xuquuqdiisa waa la dhawrayaa haddii:

i) hawshiisa marka hore lagu daabaco Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya.

ii) uu oggolaansho qoran ka haysto Wasiirka;

iii) uu weydiisadkiisu waafaqsan yahay shuruudda ku cad sharcigan.

2) Haddii qoraa shisheeye ah oo hawshiisa hore loogu ......acay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya uu dib ugu noqdo hawshiisii oo uu wax ka badbaddelo, looma dhawrayo xuqquuqda qoraha iyo daabacidda ka dhalata ku noqoshadaas ama badbaddelkaas haddii aan:

a) Qoraagu, intaannu mar kale daabicin hawshiisa aannu qoraal ahaan ku sii ogeysiin wasiirka waxyaalaha uu ka beddelay ama ka noqday naqlina uusan ka siin hawsha cusub.

b) Wasiirku fasaxin daabicidda cusub ee hawsha, iyadoon loo eegin meesha lagu daabacayo.

3) Wasiirka ma oggolaanayo mana fasaxayo daabacadda cusub haddii, ay ku noqoshada badbaddelka, hawshu aad uga duwan yahay asalkeedii hore, ama dabeecadda cusubi ay ku abuurayso fikrad xun qofka Soomaaliga ah ama ay tahay midaan la socon karin aydiyiolooojiyada aynnu qaadanay ee ah hantiwadaagga cilmiga ku dhisan iyo guud ahaan dhaqanka Soomaaliyeed.

4) i) Wasiirku wuxuu la noqon karaa ogolaanshihiisii ama fasaxiisii daabacadda cusub haddii uu ogaado in daabacadda cusubi ay waxwaxyeeleyneyso sharafta Qaranka Soomaaliyeed ama qof ka mid ah.

ii) Haddii Wasiirku uu la noqdo oggolaanshihiisii ama fasaxiisii daabacadda cusub haddii uu ogaado in daabacad cusub ee la xiriirta qaybta (I) ee la soo dhaafay, la noqoshadaasi waxay ka bilaamaysaa markuu oggolaaday ama fasaxay daabacadda cusub.

Qod. 11aad

QORAAGA SHISHEEYAHA AH OO HAWSHIISA LAGU SOO DAABACO DIBEDDA

1) Qoraaga shisheeyaha ah ee hawshiisa lagu soo daabaco dibadda waxa la dhawrikaraa xuquuqdiisa haddii

i) uu jiro wax heshiis ah oo dhex maray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo dalka ninkaasi ka yimid, lana xiriira dhawridda xuquuqda qoraha ee labada dal.

ii) Sharciyadda xuquuqda qoraha ee dalka shisheeyuhu waa inay u ballan qaadaan qorayaasha Soomaaliyeed, isagoo saldhig u ah habka wax isweydaarashada, xuquuq la mid ah kuwa uu dhawrayo sharcigani.

2) Qoraha shisheeyaha oo hawshiisa sharcigan lagu dhawrayaa waa inuu u hoggaansamaa shuruudaha ku qoran qodobka 10aad ama shuruudaha kale ee lagula heshiiyey sharcigan haddii aanlaga saamixin inuu u hoggaansamo dhammaan shuruudahan ama qaarkood, ayadoo la tixgelinayo heshiiska labada dhinac.

3) Sharcigani ma dhawrayo xuquuqda qorayaasha shisheeyaha ku jira heshiisyo caalami ah oo tiro badan haddii Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ayan beddelin ama ayan gelin heshiisyo caynkaas ah.



4) Haddii aanay la xiriirin waxyaalaha ku jira farqadaha 1,2, iyo 3 ee qodobkan, qoraaga shisheeyaha ahi wuxuu arji u qoran karaa Wasiirka isagoo dalbayo in hawshiisa sharcigan lagu dhawro; Wasiirkuna wuu oggolaan karaa arjiga caynkaas ah haddii ay la noqoto in hawshaas dhamaanteed ama qayb suuragal ahi aytaabanayso danaha Soomaaliyeed, hasa yeeshee arjiga caynkaas ah waa in la soo hordhigaa Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed si uu u gaaro oggolaansho kama dambays ah.

Qod. 12aad

QORAYAASHA SHISHEEYAHA EE HAWSHOODA LA DHALIYEEN QORAYAASHA SOOMAALIYEED

1) Haddii qorayaal shisheeye iyo kuwa Soomaaliyeed ay wadajir hawl u dhaliyaan, waa in hawshaas loo dhawraa sidii ayadoo ay dhaliyeen qore ama qorayaal Soomaaliyeed, marka hore hawshaas dalka Soomaaliyeed ha lagu daabaco amase yaan lagu daabicine.

2) Haddii, daabacidda kaddib, la ogaado in hawshaasu waxyeello u geysanayso danaha Soomaalida, wasiirka isagoo tixgelinaya oggolaanshaha madaxtooyada waa inuu amraa:

a) Inaan haawshaas mar labaad la daabicin haddii markii hore lagu daabacay dalka gudihiisa;

b) Nuqullada hawshaas oo dhan ee ku fiday dalka gudihiisa, waa in la soo urursha, lana baabi'iyaa;

t) Dheef kasta oo qorayaashu ku helaan hawlahaas iyada ah waa in laga soo ceshaa, laguna shubaa khasnadda dawladda ama la siiyaa dadkii dhaawacu ku soo gaadhay daabacaaddaas haddii uu dhaawacaasi ku caddaado. Qorayaashu waxay rafcaan amarkaas uga qaadan karaan Maxkamadda Sare.

3) Qorayaasha ay hawshoodu dhaawac u keenayso qaranka soomaaliyeed waxa bannaan in la soo taago Maxkamad, waxaana lagu xukumi karaa xabsi aan ka badnayn 2 sano, ama ganaax aan dhaafsiisneyn 3,000: ama labadaba, hadduusan sharciga Ciqaabta Soomaaliyeed (Somali Penal Laws) ku xukumin ciqaab taas ka weyn gefka uu geystay qorahaasi.

QAYBTA 4aad

NOOCYADA XUQUUQDA

Qod. 13aad

1) Xuquuqda loo dhawrayo qoraha waxa ka mid ah :

i) Xuquuqda dhaqaale; iyo

ii) Xuquuq macnawi ah (moral).

2) Qoraagu wuxuu dhammaan hawlihiisa ama qaarkood xaq ugu yeelanayaa iyadoo la waafajinayo arrimaha lagu soo sheegay qaybta 1 (i) iyo (ii) ee qodobkan.

### QODOBKA 14aad

### XUQUUQDA DHAQAALE

Iyadoo la tixgelinayo qoddobada sharcigan, ama sharci kastoo lug ku leh arrimahan:

1) Qoruhu wuxuu awood u leeyahay:-

i) Inuu daabaco hawshiisa iyo inuu go'aan ku gaaro habka hawshaas loo daabacayo.

ii) Inuu tarjumo soo qaato, soo koobo, ama hawshiisa u hagaajiyo sidii isaga la habboonaata, waafaqsanna xuquuqdiisa.

iii) Inuu beddelo, bandhigo, oggolaado in hawshiisa loo bandhigo dadweynaha.

iv) Inuu raadiyaha ka sii daayo, ama u oggolaado in hawshiisa laga sii daayo raadiyaha.

v) Inuu dadweynaha gaarsiiyo;

vi) Waa lagama maarmaan in la caddeeyo boqolleyda G% halka mar uu qaadankaro ama qayb qaybta uu qoraagu ugu yeelanayo marka hawshiisa la iibiyo ama si kale loo isticmaalo;

vii) Inuu u oggolaado in dad kale ay hawshiisa kaga faaii'deysan karaan dhammaan ama qayb ka mid ah sharciyadan.

2) i) Haddii uu qoraagu hawshiisa iibiyo iyadoo gacan ku qoran oo iibsaduhu ku sii iibiyo qiimo ka sarreeya kii uu ka helay qoruhu ama dadka dhaxalkiisa leh waa in laga siiyaa qayb suuragal ah faraqa u dhaxeeya labada iibsi; qaybta qoraha ama dadka dhaxalkiisa leh la siinayaa waa inay ahaataa sida soo socota:

b) Sh.So. 1.000 (Kun shilin) ilaa 10.000 (Toban kun) 15%

t) Sh. So. 10.000 (toban kun) ilaa 20.000 (labaatan kun) 20%.

j) Sh. So. 20.000 (labaatan kun) ilaa 40.000 (araftan kun) 30%

x) wixii ka badan 40.000 (afartan kun) 40%

ii) Qoraaga ama dadka dhaxalkiisa lehi way warsan karaan qaybtooda gadaha iyo laga gadaha ama haddii la xaraashay, cidda hawshaas xaraashtay haddii labada hore qaybtaas bixin waayeen;

iii) Qorayaasha shisheeyaha ee xuquuqda sharcigani dhawrayaa qaybtooda way weyddiisan karaan haddii sharciga qorayaasha ee dalkoodu uu xuquuq tooda la mid ah siinaayo qorayaasha soomaaliyeed, iyadoo u ah saldhig habka wax is-weydaarashada (Reciprocity).

### QODOBKA 15aad.

### XUQUUQDA MACNAWIGA AH (MORAL)

Marka la tixgeliyo qodobada sharcigan ama sharci kastoo lug ku leh arrimahan:



1) Qoraagu wuxuu xaq u leeyahay inuu:

i) Ku dacwoodo lahaanta qoraalnnimada iyo gaar ahaan inuu weyddiisto in magaciisa lagu qoro, iyadoo loo eegayo shuruudaha ku xusan qaybta (1aad) ee qodobka 14aad, marka laga reebo haddii si khalad ah loogu sheego barnaamijka raadiyaha ee la xiriira hawlaha markaas socda.

ii) Is-hortaagoo ama ku doodo in la fududeeyo waxyaalaha weecin kara, dhaawici kara ama baddeli kara ama hoos u dhigi kara qiimaha hawshiisa ama dhaawici kara sharaftiisa ama magaciisa.

2) Xuquuqda ku xusan qaybta (1aad) ee qodobkan, qoraha ama dadka dhaxalkiisa lihi waxay ku dacwoon karaan muddada sharcigani u qeeeexayo dhowridda xuquuqda qoraha.

3) Qoraaga iyo dadka dhaxalkiisa lihi waxay xaq u leeyihiin waxyaalaha ku qoran qaybta (1aad) ee qodobkan xataa haddii hore looga dhacay xuquuqdoodii dhaqaalaha sida ku qoran qodobka 14aad.

4) Xuquuqda macnawiga ah ee ku xusan qaybta (1aad) ee qodobkan lama jabin karo.

### QAYBTA 5aad

### WAREEJINTA XUQUUQDA QORAHA

### QODOBKA 16aad

### WAREEJINTA XUQUUQDA DHAQAALAHA

Haddii aysan jirin wax sharciga ka soo hor-jeeda, xuquuqda dhaqaalaha ee qoraha waa la wareejin karaa.

### QODOBKA 17aad

### WAREEJIN LA'AANTA XUQUUQDA QORAHA

### HADDII AAN QORAAL JIRIN

1) Haddii uusan jirin sharci ama go'aan Maxkamadeed, wareejinta xuquuqda qoraaga waa inay ahaataa mid qoran.

2) Qalabka wax lagu wareejinayaa waa inuu ahaadaa mid cad oo tifaftiran, waana inuu ka muuqdaa xuquqda la wareejinayo, itaalka xuquuqdaas ulajeeddada wareejinta muddada iyo meesha ama meelaha la rabo in lagaga faa'iideysto.

### QODOBKA 18aad

### XUQUUQDA AAN LA JABIN KARIN

Xuquuqda soo socotaa waa kuwa aan la jabin karin:

i) Xuquuqda Macnawiga ah ee ku xusan qodobka 15aad.

ii) Xuquuqda qoraagu uu go'aan ku gaari karo habka hawshiisa loo daabacayo, taasoo ku xusan qodobka 14aad (1) (i).

iii) Xuquuq kasta oo uu qoraagu u soo bandhigo hawl uu qaban doono;

iv) Xuquuq kastoo kale oo sharcigani uu mamnuucayo in la jebiyo.

QODOBKA 19aad

U QAADASHADA TIXGELINTA KU SAABSAN WAREEJINTA

Haddii aysan jirin wax cad oo ka soo hor jeeda, wareejin kasta oo ku saabsan xuquuqda qoraaga waxa loo qaadan karaa mid hirgashay haddii aan wareejintaas loo samayn danta qaranka.

QODOBKA 20aad

WAREEJINTA ASALKU KUMA LUG LAHA

WAREEJINTA XUQUUQDA QORAAGA

Marka uu qoraagu wareejinayo lahaanshaha hawshiisa asalka ah, shardi ma aha in xuquuqda qoraagu ay taas la wareegto.

QODOBKA 21aad

XAQ UU QORAAGU U LEEYAHAY INUU HAWSHIISA KA SOO CESHADO DADWEYNAHA.

Qoraaga oo kaliya ayaa xaq u leh inuu weydiisto Maxkamadda ku shaqo leh inay u oggolaato inuu hawshiisa dadweynaha ka soo ceshado ama waxyaalo muhim ah ka baddelo xataa haddii hore loo wareejiyey xuquuqdiisii dhaqaalaha, isagoo raacaya shuruudahan:

i) Waa inuu maxkamadda hor keeno sababo waaweyn oo caddeynaya waxa ku kallifay;

ii) Waa inuu magdhow suuragal ah siiyaa ciddii soo warsata xuquuq dhaqaale isagoo dhawraya muddada Maxkamaddu u qabato, haddii uu taas ka soo bixi waayana amarka maxkamaddu waa inuu fulaa.

QODOBKA 22aad

WAAJIBKA QORAAGA EE KU SAABSAN WAREEJINTA XUQUUQDA QORAAGA

Qoraagu waa inuu iska ilaaliyaa wax kasta oo is-hor taagi kara wareejinta xuquuqda qoraaga.

QODOBKA 23aad

MAXKAMADDA KU SHAQO LEH XUQUUQDA QORAAGA

Wixii aan la xiriirin qodobada 7 iyo 8 ee sharciga madaniga soomaalida, maxkamadda shaqada ku leh, marka ugu horreeysa, haddii loo fiirsho arrimaha ku saabsan xuquuqda qoraaga waa maxkamadda gobolka.



QAYBTA 6aad

MUDDADA

QODOBKA 24aad

MUDDADA CAADIGA AH

1) Xuquuqda qoraaga ee hawlaha suugaanta, fanka iyo cilmiga waxa la dhawrayaa inta uu qoraagu nool yahay iyo soddon sano dhimashadiisa kaddib.

2) Hawlaha wadajir ahaan loo qabto, xuquuqda qoraaga waxa la dhowrayaa soddon sano kaddib dhimashada qoraaga ugu dambeeya daddkii hawsha wada lahaa.

QODOBKA 25aad

MUDDADA HAWLAHA AAN CID LEH LA AQOON KUWA LAGULA BEEN-MAGAC BAXAY

Muddada dhawridda xuquuqda qoraaga aan la aqoon ama ka qaata magaca beenta ah, waxa laga soo bilaabayaa marka magaca aan la aqoon ama magaca runta ah ee qoraaga laga helo diiwaanka xuquuqda qoraayaasha.

QODOBKA 26aad

HAWSHA LA QABTO DHIMASHADA QORAAGA KADDIB

1) Muddada dhawridda xuquuqda qoraaga ee la xiriirta hawsha la qabto dhimashada qoraaga kaddib waxa laga soo bilaabayaa markii hawshaas la daabacayo. Ulajeeddada hirgelinta sharcigan loogu isticmaalay, «Hawsha Qoraaga Dhintay» waxa weeye:

i) Mid la daabaco kaddib marka uu dhinto qoraagu, in kastoo laga yaabo in dadweynuhu sii ogaa hawshaas qaarkeed ama dhammaanteed;

ii) Ama uu qoraagu daabacayo ama amarkiisa lagu daabacayo; laakiinse uu mar dambe ku noqday, dib u qoray, hagaajiyey ama kordhiyey, kaddib ku noqoshadaas, dib u qorriddaas, hagaajinta ama kordhintaas habka hawshaas cusub.

QODOBKA 27aad

LAMBARINTA IYO KALA QAYBINTA HAWLAHA

Hawlaha loo daabaco qayb ama qaybo lambarsan waa in loo qaataa hawl qudh ah, haddii daabaciiddaas qaybsan ay u dhaxeeyso muddo 12 bilood ah waxaase sharci ah haddii qaybahaas isku waqti loo bandhigo diiwaanka xuquuqda qoraaga waa inaan loo qaadan inay yihiin hawlo kala gaar ah.

QODOBKA 28aad

BILOWGA MUDDADA DHAWRIDDA

Marka la bilaabayo muddada dhawridda xuquuqda qoraaga ama muddo kale oo ku cad sharcigan:

i) Sannadka hawshu bilaabato ama kan ay dhammaato waa in aan la tirsan.

ii) Sannad walba maalmihiisa waa in la tirsadaa ayadoo lagu daro maalinta sannadka ugu dambaysa.

QAYBTA 7aad

WAX-QABASHADA IYO INTA XADKEEDU LE'EG YAHAY

QODOBKA 29aad

DADKA WAX KA QABAN KARA

1) Dadka tallaabo sharci ah u qaadan kara Maxkamadda Maadaniga ah ee gargaar warsan kara marka lagu xad-gudbo xuquuqda qoraaga waa qoraha iyo dadka dhaxalkiisa leh iyo cid allaale ciddui sharcigani u aqoonsado inuu leeyahay xuquuqdaas.

2) Tallaabada sharciga ah oo lagu xusay qaybta aan soo dhaafnay waxaa wadajir u qaadi kara qorayaal hawshoodu aanay kala qayb sami karin amase qorayaasha hawshoodu kala qaybsami karto, waxaase shardi ah inuusan qoraana tallaabo qaadi karin ama gargaar warsan karin ka badan intuu hawsha ku lahaa.

QODOBKA 30aad

DADKKA LEH DHAXALKA QORAAGA

1) Dadka leh dhaxalka qoraaga waa inay ku caddaataa oo waafaqsanaataa sharciga dhaxalka ee lagaga dhaqmo dalkiisa waqtiga qoraagu geeriyooday.

2) Dadka leh dhaxalka qoraaga shisheeyaha ah waa dadka lagu tilmaamay sarciga daxalka oo dalka qoraagaasi deggan yahay lagaga dhaqmo.

QAYBTA 8aad

HAWLAHA DADWEYNUHU LEEYAHAY

QODOBKA 31aad

QEEXIDDA HAWLAHA DADWEYNUHU LEEYAHAY

Si loo dhaqan geliyo ujeeddada sharcigan, «Hawlaha dadweynuhu leeyahay waa hawl kasta oo ka mid ah kuwa soo socda:



i) In kastoo aan qoraaga la aqoon, haddana waxa la rumaysan karaa inuu hawshaas dhaliyey qoraa soomaaliyeed;

ii) Hawl kastoo la daabaco ayadoon la aqoon qoraageeda ama magaciisa runta ah waxa iska leh dadweynaha ilaa ay ka caddaato magaca qoraagu ama magaciisa runta ah;

iii) Markay dhammaato muddadii sharcigani uu u qabtay dhawridda xuquuqda qoraaga iyo dadka dhaxalkiisa leh, waxay hawshii u wareegaysaa dadweynaha;

iv) Hawl kasta oo ay dawladdu dhaliso iyaduna leedahay oo aan ku jirin kuwa ku xusan qodobka 5 (1).

QODOBKA 32aad

LAHAANSHAHA GUUD EE XUQUUQDA QORAAGA EE HAWLAHA DADWEYNUHU LEEYAHAY

1) Hawlaha dadweynuhu waa lahaansho ka dhaxeysa Ummadda oo sharcigani wakiil uga dhigayo wasiirka sidii isagoo ah qoraaga, isla markaasna ilaalinaya xuquuqda iyo dheefta ka imaan karta hawlahaas.

2) Dhawrista xuquuqda qoraaga ee hawlaha dadweynaha ma laha waqti u go'an.

3) Nuqullada tarjumada, ururinta, qaadashada, habaynta ama badbeddalaad kale ee hawlaha dadweynaha, ee ay ka soo daabacaan dibedda qorayaal shisheeye ah ayagoo fasax ka haysan wasiirka lama soo gelin karo dalka Jamhuuriyadda Dimiqaraadiga Soomaaliya hadduusan Wasiirku soo gelinta jaadkaas ah oggolaan.

QAYBTA 9aad

QODOBKA 33aad

OGGOLAANSHAHA ISTICMAALKA HAWLAHA CILMIGA AH

Isticmaalidda hawl kasta oo cilmi ah waxaa oggolaan kara:

i) Qoraagii iska lahaa ama dadka dhaxalkiisa leh, ama ciddi isaga ama dadka dhaxalkiisa leh ay markaa u oggolaadaan;

ii) Qorayaalka wadajira, haddii hawlahooda la kala saari karo, iyadoo mid waliba goonidiisa u oggolaan karo in la isticmaalo qaybtiisa;

iii) Wasiirku wuxuu keli awood u leeyahay inuu oggolaado in la isticmaalaa hawl dadweynuhu uu leeyahay.

### QODOBKA 34aad

### AMARRO KHASAB AH

Wasiirku wuxuu awooddaa, isagoo ka eegaya dhanka danta caamka ah, inuu soo saaro amar khasbaya isticmaalidda hawsha cilmiga ah haddii:

i) Marka si caqliga gasha loo baaro qoraaga iyo dadka dhaxalkiisa leh inaan la qaadan karin inay yihiin kuwii dhabta ahaa.

ii) Marka qoraaga iyo dadka dhaxalkiisa leh ay si garawsho la'aan ah u diidaan inay bixiyaan oggolaanshaha loo baahan yahay.

iii) Marka qoraaga iyo dadka dhaxalkiisa leh ay ku xiraan oggolaanshaha shuruuda aan suuragal ahayn, ama fulintoodu ay keeni karto dhibaatooyinka aan laga gudbi karin.

Waxaase shardi ah:

b) Wasiirku intuusan soo saarin amarka khasabka ah, inuu siiyaa qofka iska leh xuquuqda qoraaga, fursad u suura gelisa in lagu dhageysto;

t) Dhammaan xuquuqda qoraaga ama dadka dhaxalkiisa leh ee hawsha laga hadlayo waa la ilaalinayaa waana in shuruudaha lagu dejiyey sharcigan ama xeerka laga sameeyo, si adag loo ilaaliyaa.

### QODOBKA 35aad

### DHAQANGELINTA HABBOON

Wax kastoo aan la xiriirin sharciyada qodobbada 14, 33 ama 34 ee sharcigan lama jebin karo xuquuqda qoraaga marka la isticmaalayo hawshiisa cilmiga ah ayadoo aan la baddeli karin afkii asalka ahaa ee lagu daabacay haddii aan oggolaansho laga helin qoraaga ama dadka dhaxalkiisa leh haddii:

1. Hawshaas loogu isticmaalayo maxkamad gudaheed ama xubnaha dawladda mid ka mid ah ama Hay'adaha madaxa bannaan, waxase shardi ah in loo haysto oggolaansho cad.

2. Loo isticmaalayo dan shaqsi ah waa in hawshii la daabacaa, la tarjumaa, la qaataa, la hagaajiyaa ama la beddelaa.

3. Tusaalooyinka iyo wixii kaloo hawshaas laga soo saaro waxa la raacsiin karaa hawl kale, waxase shardi ah:

b) In la xuso magaca qoraaga;

t) Tusaalooyinka iyo waxyaalaha hawshaas laga soo saaro waa inayan ka badan intii ulajeeddadu ahayd;

j) Sharciyada dhaqangalka habboon waa in la ilaaliyaa marka la isticmaalayo tusaalooyinka iyo waxyaalaha hawsha laga soo saaro.



Hawlaha laga sameyn karo tusaalooyinka waxa laga qaadan karaa maqaaladaha lagu qoro jaraa'idka iyo wargeysyada muddaaleyaasha ah. Haddii maqaaladahaasi ay saxeexan yihiin waa in la xusaa magaca qoraaga, haddii kalese, waa in la xusaa meesha marka laga helay.

4) Tusaalooyinka laga soo saaro hawl ama cajaladaha waxa la raacsiinayaa hawl kale, ama wax la gaarsiinayaa dadweynaha ayadoo ay ulajeeddada tahay in wax lagu tuso Dugsiyada, Jaamacadaha, barnaamijyada tabbarrada iyo wixii la mid ah, waxase sharci ah:

i) Tusaaluhu inuusan ka badnaan intii ulajeeddadu ahayd;

ii) Bandhigidda iyo isgaarsinta waxa loogu isticmaalayaa keliya ujeeddo waxbarasho;

iii) Magaca hawsha lagala soo baxay tusaalaha iyo magaca qoraageedaba waa in la xusaa;

iv) Sharciyada dhaqangelinta habboon waa in si suuragal ah loo ilaashaa;

5) Maqaalad lagu qoray wargeys, muddaale iyo wixii la mid ah ama raadiyo laga sii daayo, kuna saabsan arrimo dhaqaale, siyaasad diin iyo bulshada haddii mar labaad lagu soo daabaco wargeysyada, muddaalayaasha iyo wixii la mid ah, ama raadiyaha laga sii daayo aan dadweynaha la gaarsiiyo waxa sharci ah:

i) Marka la isticmaalayo maqaaladaas ama laga sii daaynayaa raadiyaha waa inayan labada marna maamnuuc ahayn;

ii) Qoraaga iyo meesha warka laga helayaba waa in la xusaa:

6) Hadday rugta kutubta dadweynaha, dugsiyada, dugsiyada loo hoydo (Kolleejooyinka ama meelaha kalee wax lagu bartaa ay dib u daabacaan hawl suugaaneed, fan ama cilmi ah oo si sharci ah hore loogu daabacay, ama ha u sawirteen ama si kaleba ha u daabacdeene, taas macnaheedu waxa weeye:

a) In Tirada nuqullada ay daabacayaan ayan ka badan inta loo baahan yahay.

b) Dib u daabciddaas iyo tirada nuqulladu waa inayan waxyeelin danaha qoraaga.

t) Cid kastoo aan ahayn qoraaga ayaa iyana daabici kara ama raadiyaha ka sii dayn kara; ayadoo loola jeedo in dadweynaha laga wargeliyo arrimaha markaas socda, ha ahaato cashar, khudbad, diineed, khudbad sharciyeed oo laga yiri maxkamad ama hawshii kalee la mid ah.

## QAYBTA 10aad

## HESHIISKA DAABICIDDA

### QODOBKA 36aad

### HESHIISKA DAABICIDDA

1) Heshiiska daabicidda waa inuu ahaadaa mid qoran oo uu qoraaga kula heshiinaayo inuu u keeno cidda wax daabacaysa hawshiisii asalka ahayd: Cidda wax daabacaysana waxay qoraha kula heshiinaysaa daabacidda, qaybinta iyo iibinta hawsha sida ku qoran heshiiska dhexmaray.

2) Sida ku qoran heshiiska, qoraagu wuxuu xaq u leeyahay inuu ka faa'iido, hawshiisa, wuxuu kaloo xaq u leeyahay inuu ka daafaco hawshiisa cid alllaale ciddii isku dayda inay waxyeelleyso marka lagu daro cidda daabacaysa nafteed.

3) Ciddii si habboon loogu oggolaaday (halkan iyo kaddibna cidda awoodda u leh) ee haysata oggolaanshaha iyo wakiilnnimada qoraaga way la geli kartaa heshiiska daabicidda ayadoo ay shardi u tahay inuu raaco sharcigan qaybta (1) ee qoddobkan.

### QODOBKA 37aad

### XUQUUQDA IYO AWOODDA DAABACAHA

1) Haddii aan heshiisku si kale daabacaha xuquuq kale ugu oggolaanayn ayadoo sharcigan la raacayo, daabacuhu ma yeelan karo wax dhaafsiisan xuquuqda daabicidda, qaybinta iyo iibinta.

2) Qodob kasta oo ka mid ah heshiiska, daabacahana u oggolaanaya inuu wax ka baddelo hawsha marka lagu daro magaceeda oo aan ahayn sixidda caadiga ah, haddii qoraagu uu diido ama samayn kari waayo sixiddaasi waxay noqonaysaa mid aan waxba ka jirin.

### QODOBKA 38aad

### WAXYAALAHA HESHIISKA LAMA HURAANKA U AH

1) Heshiisku wuxuu ka koobnaanayaa qoddobada lama huraanka ah ee soo socda:

i) Magaca qoraaga ama kan wakiilkiisa;

ii) Gunnooyinka la siin karo qoraha ama dadka dhaxalkiisa leh;

iii) Habka gunnooyinkaas loo bixin karayo;

iv) Inta jeer ee ay tahay in daabacuhu hawsha daabaco;



v) Inta nuqul ee ay tahay in daabacaaddiiba laga sameeyo.

2) Haddii aysan jirin waxyaalo u diiddani waa in had iyo jeer loo qaataa in qoraha ama dadka dhaxalkiisa lihi ay xaq u leeyihiin gunno caqligal ah oo aan ka yarayn 15% qiimaha iibka nuqul kasta ee hawsha.

3) Haddii aan heshiisku caddaynayn gunnooyinka la siin karo qoraaga ama dadka dhaxalkiisa leh, Maxkamadda shaqada ku leh ayaa u goyneysa inta iyo heerka gunnooyinka iyo habka gunnooyinka jaadkaas ah loo bixinayo.

### QODOBKA 39aad

### LUMIDDA AMA KHARRIBIDDA HAWSHA GACANTA KU QORAN KA HOR INTAAN LA DAABICIN

1) Haddii hawsha gacanta u qorani, dhammaan ama qayb ka midi, lunto ama kharribanto, inta ay daabacaha la jirto, iyo ka hor intaan ladaabicin, daabacuhu wuxuu magdhaw qoraha uu siinayaa lacag u dhiganta:

b) Wixii la siin lahaa ee heshiiska ugu jirey, haddii hawshu daabacmi lahayd.

t) Khasaaraha ka soo gaadhay hawshaa luntay.

2) Haddii ay hawsha gacanta ku qorani lunto ka hor intaan daabacaha la gaadhsiin ayadoo ay dayaceen qoraha ama dadka dhaxlkiisa lihi waxay daabacaha siinayaan hormaris kaas oo ay hore u qaateen dheeraadna ka ah gunnada ugu jirta heshiiska iyo khasaaro kasta oo daabacaha ka soo gaadha lumidda hawshaas gacanta ku qoran.

3) Haddii hawsha gacanta ku qorani ay ka lunto wakiil, wakiilkaas ayaa magdhow qoraha iyo daabacahaba ka siinaaya waxyeello kasta oo ka soo gaadhay lumidda hawshaas gacanta ku qoran.

### QODOQBKA 40aad

### MUDDADA U GO'AN GUDBINTA IYO DAABICIDDA HAWSHA GACANTA KU QORAN

1) Muddada Go'an ee:

a) Qoraha ama dadka dhaxalkiisa lihi ay daabacaha ugu gudbinayaan hawsha gacanta ku qoran:

b) ay tahay in daabacuhu hawsha ku daabaco; waxa lagu qeexayaa heshiiska daabicidda.

2))Haddii aanay heshiiska ku caddayn shuruudaha ku jira qaybta aansoo dhaafnay, maxkamadda ku shaqada leh ayaa, hadba sida arrin tu tahay, muddo suuraggal ah u qabanaysa gaadhsiinta ama daabicidda, iyada ayaanaislamarkaas go'aan ku soo saaraysa in waxyeeladii suuragal ah kooxdii geysataa kooxda kale uga magdhowdo.

QODOBKA 41aad

NUQULLADII AAN GADMIN KADDIB MARKA

HESHIISKU DHACO

1) Haddii shuruudaha ku jira dartood uu heshiisku u qabanayo muddo go'an, muddadiina ay dhammaato ayadoo ay weli gacanta daabacaha ku jiraannuqullo aan gadmin, cidda iska leh xuquuqda qoraha waxay yeeli karaan:

i) Inay nuqullada aan gadmin ku iibiyaan qiimahoodii iyo korsaar ah 10% ama.

ii) Inay daabacaha u oggolaadaan inuu nuqullada hadhsan ku iibiyo si waafaqsan heshiiska dhacay.

2) Haddii cidda iska leh xuquuqda qoraha aanay sicad u tilmaaman midkii ay dooran lahaayeen labada dow ee kore, daabacaha ayaa, isagoo aan wargelin ciddii iska lahayd, sidiisii u gadaya nuqullada hadhay sidii ayadoo cidda iska leh, xuquuqda qoraha ay dooratay in heshiiska sii socdo.

QODOBKA 42aad

DHICIDDA HESHIISKA MARKA DHAWR

DAABACADOOD DHAMMAADAAN

Wixii aan la xiriirin shuruudaha halkaas ku jira ee ku saabsan muddada, heshiiska daabiciddu waxa uu rasmi ahaan u dhacayaa mar alla markii aydhammaadaan dhawrka daabacadood ee lagu heshiiyey.

QAYBTA 11aad

HESHIISKA SOO BANDHIGIDDA

IYO BANDHIGIDDA QORAYAASHA

QODOBKA 43aad

HESHIISKA SOO BANDHIGIDDA

1) Heshiiska soo bandhigiddu waa inuu ahaadaa mid qoran oo cidda iska leh xuquuqda qoraha ay ku oggolaato inay hawshooda asalka ah koox saddexaad u gudbiyaan, kooxda saddexaadna ay ku ballan qaaddo inay hawsha soo bandhigidda isku dubaridaan.

2) Iyadoo loo eegayo shuruudaha heshiiska soo bandhigidda iyo sharcigan, ayaa cidda iska leh xuquuqda qoraha ay u xejisanaysaa xaqii hawsha iyo ka faa'iideysigeedaba ay dawga u lahaayeen si ay uga daafacaan cid kasta oo ay ka mid tahay kooxda saddexaad.

3) Shuruudaha ku jira qodobada 37 iyo 38 ee sharcigan ayaa loogu dhaqmayaa si lamid ah heshiiska soo bandhigidda kol haddii aysan jirin wax iska-hor-imaad ah oo ay u yeelan karaan heshiiska jaadkaas ah.



QODOBKA 44aad

CADDEEYNTA QORAN EE HAWL LAGU GUDDOOMAY

1) Mar alla marka hawsha la guddoonsiiyo kooxda saddexaad

Waa in kooxda saddexaadna :

i) ay caddayn qoran oo muujinaysa inay hawshii guddoomeen siiyaan cidda iska leh xuquuqda qoraha;

ii) ay ku ogeysiiyaan cidda iska leh xuquuqda qoraha muddo aan dhaafsiisnayn 30 beri, laga bilaabo maalinta ay guddoomeen, haddii uu oggol yahay isku dubbaridka hawsha.

2) Haddii muddo lix bilood ah dhexdood, laga bilaabo taariikhda la oggolaaday, aan hawshii lagu soo bandhigin, cidda iska leh xuquuqda qoraaga waxay ku dacwoon karaan in la siiyo magdhow u dhigma dheeftii ay ka heli lahaayeen haddii hawshaas labaatan goor la soo bandhigi lahaa.

QODOBKA 45aad

WAAJIBAADKA KOOXDA SADDEXAAD

1) Ayadoo la tixgelinayo waxa ku qoran heshiiska soo bandhigidda, kooxda saddexaad uma suurowdo, haddaysan oggolaansho qoran ka haysan cidda iska leh xuquuqda qoraaga, inay daabacadaan hawsha bandhigidda, kuna wareejiyaan cid kale, ama ay soo saaraan nuqullo kabadan intii dhab ahaan loo baahnaa ama ii biyaan ama lacag la'aan ku bixiyaan nuqullo ka mid ah hawshii.

2) Haddii kooxda saddexaad ay qaaddo tallaabo ka soo horjeedda qaybta 1aad, lana ogaado in tallaabadaasu ay jabineyso heshiiskii, cidda iskaleh xuquuqda qorraaga waxay magdhow ka weydiisan karaan jebinta heshiiska.

QODOBKA 46aad

CIRIIR GELINTA MADAX BANNANIDA KA FAA'IIDEYSIGA

SOO BANDHIGIDDA HAWL LA OGGOLAADAY

Cidda iska leh xuquuqda qoraaga ee hawl hore aan loo daabicin, laakiinse kooxda saddexaad ay oggolaatay soo bandhigideeda uma suurowdo haddii aysan kuheshiin qaybaha, inuu u oggolaado cidkale inay hawshiisii isticmaasho ilaa ay ka soo wareegto lix bilood, laga bilaabo marka la oggolaaday soo bandhigidda hawsha.

QODOBKA 47aad

QEEXIDDA SOO BANDHIGIDDA

Sharcigan, soo-bandhigidda waxa loola jeedaa in dadweynaha lagu gaarsiiyo:

i) Raadiyo-telefoon (Radio-telephone)
ii) Shinimada
iii) Raadiyaha ama Telifisyoon,

iv) Wax allaale wixii dadweynaha loogu soo bandhigi karo, ha noqoto hawl fan ah ama mid suugaaneed

QODOBKA 48aad

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu soo saari karaa xeerar gaar ah oo lagu maamulo xuquuqda soo-bandhigidda qorayaasha.

QODOBKA 49aad

HOBAL KASTAA WUU IS-HORTAAGI KARAA

SOO BANDHIGIDDA HAWSHIISA

1) Hobal kastaa ee la damco in hawshiisa mar labaad la soo bandhigo wuu is-hortaagi karaa soo bandhiggidda jaadkaas ah haddii ay isaga markaas la noqoto in wax la yeelayo danihiisa hobalnimada.

2) Ulajeeddada is-hortaagidda lagu xusay qaybta kore, waxa weeye in maamulaha bandhiggu wakiil ka yahay hooballadoo dhan, haddii bandhiggaas uu ka kooban yahay, koox heesaa ah iyo koox muusiikaale ah (Musicians).

QAYBTA 12aad

HESHIISKA KU MAGACAABIDDA

QODOBKA 50aad

HESHIISKA KU MAGACAABIDDA

1) Heshiiska ku magacaabiddu waa midka ay cidda iska leh xuquuqda qoraaga, xuquuqdeeda dhaqaale ee hawlaha suugaaneed, cilmiyeed ama fan ahaaneed ee ay maskaxdeeda ka dhalisay, cid kale ugu wareejineyso siin ahaan, ijaar ahaan ama iibsadaan.

2) Cidda iska leh xuquuqda qoraaga waxay xuquuqdeed cid kale ugu magacaabi kartaa:

a) Si dhan ama qayb ahaaneed;

b) marka laga eego hawsha dhammaan ahaateed ama qayb ahaanteed;

t) dhammaan muddada ay jireyso xuquuqda qoraagu ama qayb muddadaas ka mid ah;

3) Heshiiska ku magacaabidda xuquuqda qoraaga uma oggolaanayo in lagu magacaabuhu inuu ka beddelo magaca, qaabka ama waxa ku qoran hawsha lagu magacaabay.



QODOBKA 51aad

AWOODDA DIBU-BADINTA (Reproduction)

HAWLAHA LAYSKU MAGACAABO

Awoodda dibubadinta sawirrada gacanta (printing), kuwo xardhan (sculpture), kuwa kamarada (photograph) ama hawl la mid ah oo laysugu wareejiyo siin ahaan, iib ahaan amaba hab kale, waxay ahaanaysaa mid u gaar ah (remains to vest) cidda iska leh xuquuqda qoraha, haddii aan kooxuhu si kale ku heshiin.

QODOBKA 52aad

KONTROLIDDA ISTICMAALKA SAWIR GACMEED

QORSHAYNTA DHISMAHA (ARCHITECTURAL PLANS)

AMA QAABKA (DESIGNS) IYO HAWLAHA LA MIDKA AH

1) Lagu wareejiyaha sawir gacmeedka qorshaha dhismaha ama qaabka, iyo hawlaha la midka uma isticmaali karo ujeeddokageddiqaabka, iyo hawlaha la midka ah uma isticmaali karo ujeeddo ka geddisan tii loo sameeyey.

2) Haddii uusan jirin heshiis kale oo dhex-maraya labada kooxood, awoodda dibudaabicidda hawlaha ku xusan qaybta kore waxay gaar u tahay cidda iska leh xuquuqda qoraha.

QODOBKA 53aad

BANDHIGYO GAAR AH AYAA RAADIYAHa AMA

TELIFISYOONKA LAGA SII DEYN KARAA AYADOO

AY OGGOLAATAY HAY'ADDA KA MAS'UULKA AHI

Ayadoon waxba loo himayn xuquuqda qoraha ayaa bandhig kasta oo lagu daawaday Gole murtiyeet xero fagaare (public Hall) ama meelo kale oo fagaare ah raadiyaha ama telifisyoonka laga soo deyn karaa ama dadweynaha lagu gaarsiin karaa, waxase shardi ah in hay'adda bandhigga ka mas'uulka ahi ay bixiso oggolaansho qoran.

QAYBTA 13aad

KU-XAD-GUDBIDDA XUQUUQDA QORAHA

QODOBKA 54aad

XEERKA GUUD EE KU SAABSAN XADGUDBIDDA

1) Cid kasta oo ku xadgudubta, si kasta ha ku yimaadee, xuquuqda qoraha ee ku dhawrsan sharcigan wuxu noqonayaa dambiile, haddii dambigu ku caddaadana wuxuu halis u yahay hal sano oo xarig ah ama ganaax dhan Sh. So. 6.000 ama xarig iyo ganaax labadaba.

2) Qof kasta oo hore u galay, laguna xukumay dambiga lagu

soo xusay qaybta kore (1) oo haddana isla dembigii galaa wuxuu halis u noqonayaa ciqaab ku koradha mar kasta oo uu dambigaas la soo sheegay galo, waxaase shardiah in ciqaabtii korodhay aysan ka badan xabsi saddex sano ah ama ganaax dhan Sh. So. 18.000.

QODOBKA 55aad

DAABICID, GADID AMA DIBUDAABICID SHARCIDARRO AH

1) Cid kastoo daabacda, gadda ama dibudaabacda hawl dhawrsan, ama soo bandhigta ama dadweynaha gaadhsiisa ama ugu dhaqanto si kasta oo ka soo horjeedda sharcigan wuxuu noqonayaa dambiile sharcigan ku xadgudbay, waxaana lagu xukumayaa ciqaabta ku xusan qodobka 54aad.

2) Cid kasta oo daabacda ku gadda ama dib ugu badisa hawl dhawrsan, ama ku soo bandhigta ama dadweynaha ku gaadhsiisa, la'aanta oggolaanshaha cidda iska leh xuquuqda qoraha, iyo kii khaayinnimo iyo niydxumo dartood:

i) ka taga ama beddela magaca qoraha;

ii) ka taga ama, beddela magaca hawsha;

iii) baddela hawsha nafteeda ama ka taga qayb ka mid ah;

iv) daabaca ama soo saara nuqullo ka badan intii lagu heshiiyey.

Wuxuu haddii dembiga lagu qaado hali u yahay:

a) Ciqaabta ku qoran qodobka 54aad.

b) Kala wareegidda alaabta daabacan ama la soo saaray, haddii aysan alaabtaasi ahaynwax dawladdu iska leedahay, iyo kala wareegidda dhammaan nuqullada aan gadmin ee hawsha kale iyo dhammaan wixii laga soo ururiyey gadidda soo saaridda daabacidda, dibudaabicidda ama soo bandhigidda jaadkas ah ee qarsoodiga ah.

QODOBKA 56aad

QOFKA IS-HORTAAGA SOO BANDHIGID ISAGO

ISKA DHIGAYA KII LAHAA XUQUUQDA QORAAGA

1) Qof kasta oo isagoo iska dhigaya kii lahaa xuquuqda qoraaga ama wakiilkiisa idman, is-hortaagga soo bandhigid sharci ah oo hawleed ama cid kale oo ku kallifta inay is-hortaagaan, wuxuu noqonayaa dambiile sharciga ku xadgudbay wuxuuna halis u yahay in lagu xukumo xabsi aan ka badnayn 3 sano.

2) Dembiga lagu xusay qaybtan kore waa mid mudan ciqaab la fulin karo xataa haddii aysan soo caban kooxdii waxyeelladu gaartay.



QODOBKA 57aad

DACWADAHA MADANIGA AH IYO KUWA DAMBIYADA AH

EE KA DHASHA KU XADGUDBIDDA SHARCIGA WAY KALA

BAXSAN YIHIIN

Dacwadaha Madaniga ah iyo kuwa dambiiyada ah ee ka dhasha ku xadgudbidda sharciga xuquuqda qoraaga way kala baxsan yihiin, kala gaarna Maxkamad waa loogu qaadi karaa.

Xukunka ugu dambeeya ee Maxkamadda dembiga waa inay ahaataa, go'aanka lagu xiraayo hawlaha maxkamadda Madaniga ah.

QAYBTA 14aad

HAGAAJINTA IYO NIDAAMKA MADANIGA AH

Civil Remedies and Procedure)

QODOBKA 58aad

DACWADAHA MADANIGA AH

Qof kasta oo xuquuqdiisa sharcigan ku jirta laga dhacaa, haddii aansharcigu si kale u jeedin, wuxuu:

i) ku dacwoon karaa magdhaw xaq ahoo, laga siiyo waxyeelladii kasoo gaartay dhicii;

ii) Maxkamadda ka codsan karaa inay amar bixiso ay dhac dambe kaga joojineyso kooxdii xaqiisa ku xadgudubtey;

iii) Maxkamadda ka codsan karaa inay ciddii dhacday ku qasabto inay xisaab habboon bixiyaan (show proper account).

iv) Warsan karaa hagaajin kastoo kale oo ku timaadda sharcigan xuquuqda qoraha.

QODOBKA 59aad

KHARASHKA DACWOOYINKA MADANIGA AH

Dacwooyinka madaniga ah ee ku saabsan xadgudbidda xuquuqda qoraaga, kharshka waxa laga bixinayaa si waafaqsan qodobada 61aad iyo 67aad ee xeerka habka madaniga (Civil Procedure code) iyo xeer kastoo maamulaya kharashka dacwooyinka madaniga ah.

QODOBKA 60aad

CIDDA ISKA LEH XUQUUQDA QORAAGA EE LA SIINAYO

DHACA DHEEFTIISA

Haddii la dhaco xuquuq sharcigan dhawraayey; cidda iska leh xuquuqda qoraaga waxay daw u leeyihiin:

i) Dhammaan dheefta uu xadgudbuhu ka soo hooyo dhaca jaadkaas ah;

ii) Dhammaan nuqullada aan gadmin ee hawshoodii laga sameeyey;

iii) Dhammaan biraha wax lagu daabacay (plates) ama lagu tala jirey in lagu daabaco muddadii xadgudubku socdey.

QODOBKA 61aad

CIDAHA WADA LEH XUXUUQDA QORAAGA, WADAJIR IYO KALA JIRBA WAY U DACWOON KARAAN

Haddii xuquuqda qoraaga ee la dhacay ay wada lahaayeen dad qof ka badani dadkaas xuquuqda qoraaga wada lihii wadajir ahaan iyo kalajir ahaanba, xadgudbidda way u dacweyn karaan qofka dhacay, waxase shardi ah inay maxkamaddu qaybiso wixii la helo haddii kooxdu wada lahayd xuquuqda siman ay dhexdooda ka dhacdo xadudbid.

QODOBKA 62aad

LAMA DUMIN KARO DHISMO LAGA DHISAY XUQUUQDA QORAHA OO LA DHACAY

1) Guri lagu dhisay xuquuqda qoraha oo la dhacay lama dumin karo ayadoo loo cuskanayo sababaha hoos ku qoran :

a) Haddii aan la raadin oon la heelin marka hore oggolaanshaha qofka iska leh xuquuqda intaan hawsha mashruuca la dhexgelin; ama

b) in-kastoo la raadiyeey, lana helay oggolaanshaha qofka xaqa iska leh, haddaan dhismaha loo samayn si waafaqsan sidii ay qorshaynta ahayd.

2) Arrimaha lagu soo xusay qaybta kore, cidda meel lagaga dhacay xuquuqdooda waxay weydiisan karaan:

i) Magdhow u dhigma meelkadhaca ka yimid ku-xadgudbidda;

ii) in xadgudbaha amar qoran lasiiyo si uusan dhibaatooyin iyo meelkadhac dambe u geeysan.

QODOBKA 63aad

SOO KOOBIDDA HABKA DACWOOYINKA DEGDEGGA AH

Maxkamadda waxay hirgelin kartaa soo koobid hab dacwadeed markay maxkamadda la noqoto inay amar ka bixiso markay yimaadaan arrimo deg deg ah, lana hirgeliyo jirista habkaas.

QAYBTA 15aad

DIIWAAN GELIN

QODOBKA 64aad

DEEBAAJI SHARCI AH

1) Daabacaha, hawl kastoo suugaaneed, fan ama cilmiyeed, waa inuu uu dhigaa deebaaji ahaan, kharashkana iska bixiyaa, laba nuqul oo hawshiisa ah, meel kasta oo meelaha soo socda ka mid ah:



a) Xafiiska Diiwaanka xuquuqda qoraha;

b) Rugta Kutubta Ummadda;

t) Rugta Kutubta Jaamicadda Ummadda kale oo laga yaabo in la abuuro mustaqbalka;

j) Akadeeemiyaha Dhaqanka Ummadda.

2) Deebaajiga lagu soo sheegay qaybtaa kore waa in lagu keenaa 30 beeri gudahood marka laga bilaabo maalinta la daabacay hawshaas.

3 Haddii daabacuhu ku keeni waayo muddadii loo qabtay deebaajiga lagu soo sheegay qaybta aan soo dhaafnay, cidda iska leh xuquuqda qoraaga wuxuu deebaaji ahaan u geyn karaa labo Nuqul Xafiiska Diiwaanka iyadoo kharash uu daabacuhu bixinaayo.

QODOBKA 65aad

DEEBAAJIGA MASAWIRRADA, SAWIRRADA ASLAN (PAINTING) IYO MASAWIRRADA XARDHAN)

Qoraha masawirrada xardhan, qorshaynta, dhismaha, sawirrada aslan ama wixii la mid ah waa inuu geeyaa xafiiska Diiwaanka xuquuqda qoraaga isagoo raacinaya arjiga uu ku warsanayo diiwaan gelinta, masawirro tilmaamaya hawshiisa (lagana soo sawiray dhan kasta haddii sawirku uu yahay mid xardhan) ama wax allaale wixii u gaar ah hawshaas ee fududaynaaya aqoonsigeeda.

QODOBKA 66aad

HAWLAHA SHINEEMOOYINKA IYO KUWA GOLAYAASHA MURTIDA.

1) Maamulaha hawsha shineemada ama tan Golaha Murtida wuxuu mas'uul ka yahay diiwaan gelinteeda.

2) Waa inuu soo raacsiiyaa arjiga uu ku warsanayo Diiwaan gelinta hawshii shinemada ama golaha murtida oo la soo koobay, isagoo keenay xafiiska Diiwaanka gelinta masawirrada qaybaha uguwaaweyn filinka.

QODOBKA 67aad

SHAHAADO DIIWAAN GELIN OO KU MEEL GAAR AH

1) Xafiiska Diiwaan Gelinta Xaquuqda Qoraaga waa inuu qoraaga siiyaa shahaado Diiwaan Gelin ah oo ku meel gaar ah oo ay ku qoran yihiin:

i) Magaca, cunwaanka iyo Jinsiyadda qoraaga;

ii uu masawirrada iyo waxyaalaha

gaarka taar alaabtaa la keenay;

daabacay;

caynkaas ah waa in loo aqoonsadaa

QODOBKA 68aad

HABKA DIIWAAN GELINTA

1) Mar allaale marka Xafiiska Diiwaan gelinta xuquuqda qoraaga loo keensado arjiga diiwaan gelinta iyo qoraallada loo baahan yahay waa inuu arrimaha soo socda ku soo daabaco faafinta rasmiga ah:

i) Nooca iyo magaca hawsha;
ii) Haddii hawsha hore loo daabacay;
iii) Magaca iyo cunwaanka qoraaga;
iv) Jinsiyadda iyo meesha qoraagu deggan yahay; iyo
v) Wax allaale wixii hawshaas la xiriira.

2) Xafiiska Diwaan gelinta xuquuqda qoraaga, marka ay ka soo wareegto 30 beri laga bilaabo taariikhda arrimahaas aan soo sheegnay lagu daabacay faafinta rasmiga ah, uu siiyaa cidda shahaadadii ku meel gaarka ahayd haysatay, haddii wax taas ka soo hor-jeeda ayaa 30kaas beri kusoo bixin, shahaadadii dhabta ahayd ee Diiwaan gelinta iyo lambarka diiwaanka.

QODOBKA 69aad

WAXYAALAHA KA SOO HORJEEDA DIIWAAN GELINTA

1) Haddii wax ka horjeeda Diwaan gelinta ay soo baxaan muddo 30 beri ah gudahooda, sida lagu soo sheegay qaybta labaad ee qodobka 68aad, Xafiiska Diiwaan Gelinta waa inuu jawaab qoran ku keenaa muddo 5 beri gudahood ah.

2) Xafiiska Diiwaan gelintu waa inuu, 10 beri gudahood laga bilaabo taariikhda uu helay jawaabta qoraha lays hortaagay arrintiisa, soo saaraa, isagoo sababaha caddaynaya, Dekreeto uu ku oggolaanayo ama ku diidaayo Diiwaan gelinta, waana inuu si dhaqso ah go'aankiisa u ogeysiiyaa cid kasta oo ay danayso.

3) Cid allaale ciddii uu waxyeelaayo go'aanka Xafiiska Diiwaan gelintu; waxay rafcaan u qoran kartaa Wasiirka oo go'aankiisu uu yahay kama dambeystii waana inay haddii markaas Maxkamadda Sare oo iyadu iska leh maamulka hawshaa ay meesha ka maqan tahay, ku qoraan Diiwaanka loogu tala galay Dakreetada Wasiirka.

QODOBKA 70aad

DAABACAHA KEENI WAAYA DEEBAAJIGA SHARCIGA AH

Daabicihii Xafiiska Diiwaan gelinta ku keeni waaya deebaajiga tirada nuqullada laga rabo hawl kastoo uu daabacay muddada hore loo soo sheegay, wuxuu mudanayaa ciqaabta ku qoran qodobka 55aad, ee sharcigan awoodna uma laha inuu ku doodo xuquqdiisii sida sharciga qabo ama kolka la eego waxa ku qoran heshiiska daabicidda, ilaa uu ka keeno nuqulladii deebaajiga ahaa ee laga rabay.



QODOBKA 71aad

DEEBAAJIGA NUQULLADA HAWSHA AAN LA DAABICIN

Cidda iska leh xuquuqda qoraaga hawl aan la daabicin, jecelna in hawshiisa loo dhowro, waa inuu xafiiska Diiwaan Gelinta xuquuqda qoraaga keenaa nuqul heshiisa gacanta ku qoran ah, soona raaciyaa arjiga uu ku warsanayo diiwaan gelinta

QODOBKA 72aad

HAWLAHA AAN DIIWAANKA LA GELIN KARIN

Xafiiska Diiwaan Gelinta xuquuqda qoraaga waa inuu diiwaan gelinta hawl la daabacay, haddii ayan si caddaan ah uga muuqan arrimaha gaarka ah ee soo socda :

i) Magaca qoraaga haddii aysan hawshu ahayn mid aan qoraageeda la aqoon ;
iii) Magaca cidda daabacday ;
iii) Taariikhda la daabacay qayb kastoo hawshaasi ka mid ah;
iv) Meesha lagu daabacay ;
v) Waa inay ka muuqataa xarafka C oo ku jira garangar C, taasoo tilmaamaysa in hawshu ay leedahay xuquuqdii qoraaga.

QOQDQOBKA 73aad

CASHUURTA DIIWAAN GELINTA

Heerka cashuuraha Diiwaan Gelinta ee xafiiska diiwaan gelintu uu goynaayo; marka loo eego nooca hawshu waxay tahay, waa in lagu sugaa dekreetada Wasiirka.

QAYBTA 16aad

XAFISKA DIIWAAN GELINTA XUQUUQDA QORRAGA

QODOBKA 74aad

ABUURISTA XAFIISKA DIIWAAN GELINTA

1) Waa in Wasaaradda laga abuuraa Xafiiska Diiwaan Gelinta xuquuqda qoraaga, uuna maamulaa qof diiwaanhaye u ah xuquuqda qoraaga (halkan kaddib ah «Diiwaan-Gelinta» iyo Diiwaanhaye»).

2) Wasiirku wuxuu magacaabi karaa qof ama dad badan oo kaaliya Diiwaanhayaha mas'uulka ka ah Xafiiska Diiwaan-gelinta ama laamihiisa ku yaalla gobollada ama Degmooyinka dalka.

3) Abuurista iyo nidaaminta Xafiiska Diiwaan Gelinta waxaa sal u ah Dekreetada Madaxweynaha J.D.S., iyadoo la tixgeelinayo xaaladda Wasiirka.

## QODOBKA 75aad

## DIIWAANAADA UU HAYNAYO DIIWAANHAYUHU

1) Diiwaanhayuhu waa inuu hayaa, ugu yaraan, Diiwaannada soo soc-da :-

i) Diiwaanka hawlaha Suugaanta ;

ii) Diiwaanka hawlaha Fanka ;

iii) Diiwaanka hawlaha Cilmiga ah ;

iv) Diiwaanka hawlaha dadweynaha ;

v) Diiwaanka guud oo ay si buuxda ugu qoran yihiin dhammaan hawlaha la diiwaaniyey.

## QODOBKA 76aad

## DIIWAANGELINTA HESHIISYADA IWM IYO WAXYAALAHA GAARKA U AH XUQUUQDA QORAAGA

Diiwaan hayuhu waa inuu diiwaanka loogu tala galay geliyaa waxyaalaha kale marka lagu daro arrimaha soo socda:-

i) Heshiis kasta, oo aan ahayn mid sharcidarro ah, ee la xiriira xuquuqda qoraaga sidii heshiisyada ku saabsan tarjamidda hawsha ama iibinta ama wareejinta kale ee xuquuqda qoraaga.

ii) Amarkastoo sharci ah ee ka soo fula Wasiirka;

iii) Xukunno, amarro, ama Dekreetooyin ka soo baxay Maxkamaddu ku shaqada leh; lana xiriira xuquuqda qoraaga;

iv) Shahaadooyinka ku meel gaarka ah iyo kuwa dhabta ah ee diiwaan gelinta iyo wax allaale wixii hawsha gaar u ah.

## QODOBKA 77aad

## ASTAANTA DIIWAAN GELINTA

Xafiiska Diiwaan gelintu waa inuu leeyahay astaan u gaar ah oo ay ka muuqato astaanta Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo magacyada Wasaaradda iyo Xafiiska Diiwaan gelinta, Maxkamaduhuna waa inay aqoonsadaan qoraalka ay ka muuqato astaantaasi.



## QODOBKA 78aad

## SOO SAARIDDA NUQULLADA AMA WAXYAABO GAAR AH EE HAWL LAGA SOO DHEX SAARAY EE HORE LOO DIIWAANIYEY

Marka uu soo weydiisto qof kasta oo uu daneeyaa, Diiwaanhayuhu wuxuu siinayaa nuqul run ah ee la aqoonsaday oo wax kasta oo la soo warsado ah; kuna jira mid kasta oo diiwaanadiisa mid ah, ama wuxuu siinayaa waxyaabaha hawl laga soo dhex saaray, waxaase shardi ah in cidda raadinaysa nuqulka ama waxyaalaha hawsha laga soo dhex-saaray inay bixiso cashuuraha u degsan arrimaha caynkaas ah.

## QODOBKA 79aad

## WAR KA RAADINTA DIIWAANADA

1) Cidda kasta oo ay danayso, jecelna in war laga siiyo mid ah Diiwaannada uu hayo Diiwaanhayuhu wuxuu arji u soo qoranayaa Wasiirka, kaasoo amar ka bixin kara in cidda arjiga soo qoratay la siiyo warka ay dooneyso. Mar haddii Wasiirka uu amarkaas bixiyo, cidda arjiga soo qoratey waa in la siiyaa warka ay doonayo waqtiyada ku habboon.

2) Ulajeeddada dhaqangelinta sharcigan «Waqtiga habboon» wuxuu macnihiisu yahay saacadaha rasmiga ah ee shaqada, haddii aysan jirin waqtiyo gaar ah oo uu shaqeeyo Diiwaanhayuhu, dadweynaha la ogeysiiyey.

3) Cidda arjiga soo qoratay, wardoonkana ahayd, haddii Wasiirku arjigooda soo diido, waxay dacwad u qoran karaan Maxkamadda Sare.

## QAYBTA 17aad

## WAX KA BEDDELIDDA DIIWAANNADA IYO GEFAFKA UU SAMEEYO DIIWAANHAYUHU

## QODOBKA 80aad

## SIXIDDA YAR EE DIIWAANHAYAHA

Diiwaanhayuhu wuxuu Diiwaan kasta ku samayn karaa sixid yar oo ah waxyaalaha la diiwaaninayo ama laga hanfafay ee ku saabsan magaca iyo cunwaanka qofka diiwaanka ku jira ama waxyaalo kale oo gaar ah oo aan qofna xuquuqdiisa waxyeelayn; waxase shardi ah in diiwaanintaas ama hanfadidaas ay markoodii hore ku dhaceen gef niyadsami ah.

## QODOBKA 81aad

## MAXKAMADDA AYAA AMRI KARTA SIXIDDA AMA WAX KA BEDDELIDDA DIIWAANNADA

1) Maxkamadda shaqada ku lihi waxay amri kartaa, marka diiwaanhayuhu arji u soo qorto, cidda iska leh xuquuqda qoraaga ama ciddii kastee ay danayso, mid kasta oo ka mid ah waxyaalaha soo socda :

i) Diiwaangelinta wax gef ahaan looga hanfafay;
ii) Tirtirodda Diiwaaninta gef ahaan diiwaanka loo geliyey;
iii) Hagaajinta qalad kasta ama nuqsaan diiwaanka ku jirtaa.

2) Amar kasta oo ka soo baxa Maxkamadda shaqada ku leh, kuna saabsan Diiwaaninta, hanfafidda ama hagaajinta diiwaan kasta racfaan baa laga qaadan karaa.

## QODOBKA 82aad

## OGAAN U HABAABINTA MAXKAMADDA AMA DIIWAANHAYAHA

1) Haddii Diiwaanhayuhu uu ogaan u musuqmaasuqo diiwaan kasta ama u bixiyo shahaado been ah ama waxyaalo hawl laga soo dhexsaaray, isagoo ku dacwoonaya inay tahay nuqulkii dhabta ahaa, ee hawl kastoo diiwaanka ku jirta ama uu markhaati been ah maxkamadda ka furo, wuxuu mudanayaa xabsi aan ka badnayn 15 sano ama ganaax aan dhaafsiisneeyn Sh. So. 20.000/- ama labadaba.

2) Haddii uu Diiwaanhayuhu ku kaco mid kasta oo ka mid ah waxyaalaha laga xusay qaybta (1aad) eee kore oo waxyaalaha uu rabay ee taas ka dhalan karaan ay ka daba dhacaan (desireed consequences), wuxuu mudanayaa xabsi aan ka badnayn 20 sano ama ganaax aan dhaafsiisnayn Sh So. 30.000:- ama labadaba.

## QODOBKA 83aad

## OGAAN U MUSUQMAASIQIDDA DIIWAANHAYAHA

1) Haddii Diiwaanhayuhu uu ogaan u musuqmaasaqo diiwaan kasta ama uu bixiyo shahaado been ah ama waxyaalo hawl laga soo dhex saaray, isagoo ku dacwoonaya inay tahay nuqulkii dhabta ahaa, ee hawl kastoo diiwaanka ku jirta ama uu markhaati been ah Maxkamadda ka furo, wuxuu mudanayaa xabsi aan ka badnayn 15 sano ama ganaax aan dhaafsiisnayn Shs. So. 20.000/- ama labadaba.

2) Haddii uu Diiwaanhayuhu ku kaco mid kasta oo ka mid ah waxyaalaha lagu xusay faqradda (1d) ee kore oo waxyaalaha uu rabay ee taas ka dhalan karaana ay ka daba dhacaan (desired consequense), wuxuu mudanayaa Xabsi aan ka badnayn 20 sano ama ganaax dhaafsiisnayn Shs. So. 30.000/- ama labadaba.



## QODOBKA 84aad

## MUSUQA KA YIMAADA FIIRADARRO CIQAAB MUDAN

1) Haddii Diiwaanhayuhu, fiiro darro ciqaab mudan darteed, uu ku kaco mid kasta oo ka mid ah waxyaalaha lagu soo sheegay qodobka 83aad. Wuxuu mudanayaa xabsi aan ka badnayn 8 sano ama ganaax aan dhaafsiisnay Sh. So. 10.000/- ama labadaba.

2) Haddii aan macnuhu ulajeeddo kale tilmaameyn «Diiwaanhaye» waxa wehliya, ulajeeddada sharcigan, kaaliyaha Diiwaanhayaha iyo xubin kastoo ka mid ah shaqaalaha xafiiska diiwaanhayaha xuquuqda qoraaga.

## XEERAR GAAR AH OO KU-MEELGAAR AH

## QODOBKA 85aad

## TALLAABADA U HORRAYSA EE SHARCI GEYNTA

Sharci geynta dacwada dembiga ah ee laga galo xuquuqda qoraaga, kooxda wax la yeelay waxa tallaabada u horraysa ugu dhaqaaqaya Diiwaanhayaha ama sarkaal kastoo Booliiska ka tirsan oo ogaada, si kasta ha ku ogaadee, in dembiga caynkaas ah la galay.

## QODOBKA 86aad

## WIXII KA DHIMAN SHARCIGAN

Halkii aan sharcigan shuruudo habboon lahayn, waxa gelaya, laguna dhaqmi karaa Xeerka Madaniga ah ama Sharciyada kalee Madaniga ah.

## QODOBKA 87aad

## DARDAARAN KU MEELAYNTA XUQUUQDA QORAAGA

1) Cidda iska leh xuquuqda qoraaga waxay xaqeeda ama qayb ka mid ah ku meelayn kartaa dardaarran waafaqsan sharciga shaqsiga ah ee markaas ay dardaarmayso dalkeeda ka socda.

2) Wareejin kasta oo cidda iska leh xuquuqda qoraaga ay xaqeeda ku meelayso ayadoo u jirran cudurkii u dambeeyey ee ay u dhiman lahayd, waxa loo qaadanaya si Xeerkan loogu dhaqmo darteed, in dardaaran lagu meeleeyey.

QODOBKA 88aad

DACWEYN BEEN AH AMA AAN MACNE WEYN LAHAYN

(FRIVOLOUS) OO KU KACO QOF ISKA DHIGAYA

INUU LEEYAHAY XUQUUQDA QORAAGA

1) Cid kasta oo uu ku cabsiiyo qof iska dhigaya inuu leeyahay xuquuqda qoraaga, dacweyn been ah ama aan macne weyn lahayn oo ku saabsan xuquuqda qoraaga, waxay Maxkamadda shaqada ku leh warsan kartaa:

i) In la bixiyo amar cabsiiyaha u diidaya inuu dib u sameeyo cabsiin noocaas ah;

ii) In cabsiiyaha lagu amro inuu qofka la cabsiiyey siiyo magdhowga waxyeello ama khasaare kasta oo kaga yimaada cabsiintaas laga soo dacwooday.

2) Si xeerkaan loogu dhaqmo, maxkamaddu waxay u qaadanaysaa, haddii aysan jirin wax cad oo taas is-hor taagayaa, in dacwada cabsiinta ahi ay been ama macnadarro tahay haddii:-

a) Cabsiiyuhu dacwadiisa maxkamad ku geyn waayo 30 berri gudahood, laga bilaabo taariikhda uu ku kacay cabsiintaa hore loo soo sheegay;

b) Cabsiiyihu ku laabto cabsiinta ka hor inta aysan dhammaan 30ka berri, laga bilaabo taariikhda cabsiinta ugu horreysay.

QODOBKA 89aad

ASTAANTA KU MEEL-GAARKA AH EE DIIWAANINTA

Ilaa intay ka soo baxayso astaanta rasmiga ah ee Diiwaanintu ee lagu caddeeyey qodobka 77aad. Diiwaaninta waxa lagu isticmaalayaa astaan kasta ama shaabad rabadh ah oo ku tilmaaman Wasiirka.



QODOBKA 90aad

MUDDADA DHAWRIDDA HAWLAHA QORAYAASHA

SHISHEEYAHA

Wixii aan la xiriirin shuruudo kasta oo ka duwan kuwa sharcigan ama sharci kastoo kale, muddada dhawridda xuquuqda qoraaga ee hawl uu qabtay qore shisheeye ahi waxay noqonaysaa tan uu u xaddiday sharciga qoraha dalkiisu, haddii sharciga dalkiisu uu tilmaamayo muddo ka gaaban tan uu u xaddiday sharcigani.

QODOBKA 91aad

DIIWAAN GELINTA HAWLAHA SHARCIGAN KA

HORREEYEY

1) Ma jirto hawl, aan ahayn hawlaha danaha (domain) dadweynaha oo u hore jirtay taariikhdii uu sharcigani dhaqan galay oo u qalanta dhawridda, haddii aan lagu diiwaanin 12 bilood gudahood, laga bilaabo taariikhda hore loo soo sheegay.

2) Arjiilaha diiwaanin la raba hawl sharcigan ka horreysey, wuxuu diiwaanhayaha u keenayaa:

i) Arji uu ku codsanayo diiwaaninta oo ay ku qoran yihiin:

a) — Magaca Hawsha;

b) — Haddii hore loo daabacay, taariikhda iyo meesha lagu daabacay;

t) — Magaca, cunwaanka, jinsiyadda iyo degaanka qoraha;

j) — Cidda iska leh xuquuqda qoraaga haddii uu qoruhu dhintay;

ii) Saddeex nuqul oo hawsha ah;

iii) Waraaq-sharciyeed (Affidavit) uu ku caddeeynaayo inuu isagu yahay qorihii ama dhaxlihii.

QODOBKA 92aad

DIIWAAN GELINTA HAWLAHA DANAHA DADWEYNAHA

Hawl kasta oo lagu caddeeyey Deekreetada Wasiirka inay tahay hawl dadweynuhu iska leeyahay waa in haddii aysan jirin wax taas diidayaa kolkiiba la diiwaaniyaa ayadoo aan lagu xirin hab kastoo jira.

QODOBKA 93aad

BURIN

Sharci kastoo ka soo horjeeda, ama aan la socon karin sharcigan waa la buriyey.

QODOBKA 94aad

XEERHOOSAADYADA

Madaxweynha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ayaa samayn kara xeerhoosaadyada sharcigan lagu dhaqan geliyo.

QODOBKA 95aad

DHAQANGALKA

1) Sharcigan waxa lagu darayaa Ururinta Rasmiga ah ee sharciyada, waxaa lagu daabacayaa Faafinta Rasmiga ah.

2) Wuxuu dhaqan galayaa mar alla marka uu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Deemoqraadiga Soomaaliya.

3) Dadoo idil waxa waajib ku ah inay u aqoonsadaan una dhawraan inuu yahay sharciga Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 7 Sebteembar 1977

Jaallee S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Madaxweynaha

Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed



SHARCI L. 67. Meel Marin Heshiis Amaahda ee dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika.

MADAXWEYNAHA

J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada tirsigoodu yahay 1,17,18, iyo 19 ee soo baxay 1dii Luuliyo, 1976.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Bankiga Horumarinta Afrika, kuna saabsan Mashruuca Daabacada Kutubta, laguna kala saxeexday 4tii Maajo, 1977, Abdijaan.

ISAGO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee 22.9.1977.

Wuxuu soo saara sharciga soo socda :

QODOBKA I

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Bankiga Horumarinta Afrika, ee la saxeexay 4tii Maajo, 1977, waa la meelmariyey.

QODOBKA II

Heshiisku wuxuu ku yeelan doona Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmi ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 12 Oktoober 1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

LAW Ns. 67 on 12 Oct. 1977. The Loan Agreement between the Somali Democratic Republic and the African Development Fund.-

THE PRESIDENT

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN: The 1st, 2nd and 3rd. Charters of October 21st Revolution 1969.

HAVING SEEN: Law No. 1, 17, 18 and 19 of 1st July, 1976.

HAVING SEEN: The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Fund (ADF), for financing Somali Textbook Printing Project. signed on 4.5.1977, at Abdijan.

TAKING NOTE: Of the approval of the Political Bureau and that of the Council of Ministers on 7.7.1977.

Hereby promulgates the following law:-

Article I

The Loan Agreement between the Somali Democratic Republic and the African Development Fund, for financing Somali Textbook Printing Project, signed on 4th May, 1977 at Abdijan, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic, and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadisho, on 12 Okt. 1977.

Major General Mohamed Siad Barre
President of the
Somali Democratic Republic



SHARCI L. 68 ee 17 Okt. 77, Baabi'inta Sharciga Lam. 11 ee soo baxay 5tii Oktoober 76 ee lagu Mideeyey Warshadda Hilibka Kisimaayo iyo Wakaaladda X. Xoolaha (L.D.A.).-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

MARKUU ARKAY: Sharciyada kala ah 1, 17 ,18, 19 ee soo baxeen 1.7.1976;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 31 ee soo baxay 10.3.1973, laguna dhisay Warshadda Hilibka ee Kismaayo;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 11 ee soo baxay 5.10.1976 ee lagu mideeyey Warshadda Hilibka & Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (L.D.A.)

ISAGGO AQOONSADAY: Iney tahay lagama maarmaan in Warshadda Hilibka ee Kisimaayo ay ahaato mid iskeed u madax bannaan (Ente Autonomo);

ISAGOO ARKAY Go'aankii Guddiga Siyaasiga & Golaha Wasiirrada:

WUXUU SOO SAARAYAA:

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Waxaa la baabi'iyey Sharciga Lambarkiisu yahay 11 ee soo baxay 5tii Oktoobar 1976ee lagu mideeyay Warshadda Hilibka ee Kisimaayo iyo Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (LDA).

Qod. 2aad

Warshadda Hilibka wixii ka billawda 15 Oktoobar 1977, waxaa loo aqoonsaday inay tahay Wakaalad iskeed u Madax Bannaan, waxaana lagu dhaqayaa Sharcaiga Lamb. yahay 31 ee soo baxay 10 Maarso 1973.

Qod. 3aad

Ilaalinta Guud ee Warshadda Hilibka waxaa yeelanaya Wasaaradda Warshadaha, sida ku cad qodobka 2aad ee Sharciga Lam. yahay 31 ee soo baxay 10kii Maarso 1973;

Qod. 4aad

1. — Laanta Ganacsiga ee Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (LDA) ee Gobolka Jubbadda Hoose, qalabkeed iyo Shaqaalaheeda waxaa loo wareejiyay Warshadda Hilibka ee Kisimaayo.

2. — Warshaddu waxay awood u leedahay iney ka ganacsato suuqa furan Xoolaha ay u baahan tahay si ay u hesho Xoolo ku filan;

QOD. 5aad

Waxaa la baabi'iyey Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.-

Qod. 6aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa kaddib marka uu saxiixa Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17.10.1977.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre



# BOGGA LABAAD

## XEER

XEER WASAARADDA XOOLAHA DHIRTA IYO DAAQA, 5 Okt. 77, wax ka beddelid sicirka iibka daawada Xoolaha ee ku qoran lifaaqan «B» kan 6aad iyo kan 7aad ee Sharciga lamb. yahay 30 soona baxay 6dii Maarso 1976 L. 89.

WASIIRKA

WASAARADDA X. XOOLAHA DHIRTA & DAAQA

ANIGA OO ARKAY: Warqaddii ugu horreysay ee Kacaanka ay Kula wareegeen G.S.K. Awooddii sharciga, xukunka iyo fulinta

ANIGA OO ARKAY: Sharciga 17, 18 iyo 19 Kowdii Luuliyo 1976.

ANIGA OO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 30ka soona baxay 6da Maarso 1977kii.

UGU DAMBEYN: Anigoo dhageystay talidii Wasiirka Maaliyadda ee ku qorneyd Warqadda summaddeedu tahay AG/X/21-03452 ee 2 Oktoobar 1977.

AMAR XEER DEJIN

QODOBKA 1aad

Waxaan oggolaaday in wax laga beddelo sicira iibka daawada Xoolaha ee ku qoran lifaaq «B» lambarkiisa 6aad iyo kan 7aad ee sharciga lam. yahay 30 soona baxay 6dii Maarso 1977, sababta oo ah sicirkii daawada dibedda looga keeni jiray oo hoos u dhacay.

QODOBKA 2aad

Sicirkaas waxaa loo dhigay hoos, wuxuuna noqon doonaa sidatan hoos ku qoran:

B): Oxytetracylin 1cc waxaa laga dhigay 0,25 (shan & labaatan senti), meeshii uu ka ahaan jiray 0,50.

T): 1cc waxaa laga dhigay 0,25 (shan & labaatan " uu ka ahaan jiray 0,50 (konton santi).

QODOBKA 3aad

Qodobka 2aad labadiisa Xaraf ee kala ah B iyo T ee kor ku qoran waxay beddeli doonaan lambar 6 iyo 7 ee ku xusan lifaaqa «B» ee sharciga lambarkiisu yahay 30 ee 6 Maarso 1977.

QODOBKA 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gali doonaa markii lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Oktoober 1977.

WASIIRKA WASAARADDA XOOLAHA
DHIRTA IYO DAAQA
(Dr. Yuusuf Cali Cismaan

Waa aragnay ee Diiwaangelin
Diiwaan lamb. 1 bogga lamb. 46
Muqdisho, 17 Okt. 1977
Hantidhowrka Guud
G/Sare Cabdillahi Warsame Nuur



SHIRKADDA KOJU (COGU)

Waxaa la Ogeysiinayaa dhammaan samilayaasha ka mid ah Sharikadda KOJU (Cogu), ee fadhigeedu yahay Kisimaayo.

In shirweynihii kowaad ee sannadkii 1976, lagu qabandoono Xarunta Sharikadda, ee Degmada Kismaayo, taar. markay tahay 20 Dis. 77, saacadduna tahay 8da fiidnimo fadhiga hore.

Haddii fadhiga hore suuragal noqonwaayo kan labaad waxa la qabandoonaa 25 Dis. 77, isla saacadda kor ku dhigan, isla Xarunta Kisimaayo.

ARRIMAHA LAGA DOODI DOONO

1. — Miisaaniyadda sannadkii 1976,
2. — Doorashada Guddiga Maamulka Shirkadda
3. — Hawlaha Sharikadda
4. — Doorashada Guddiga Baarista ee Sharikadda
5. — Wixii kale oo la xiriira danaha Sharikadda.

GUDDIGA MAAMULKA

Kisimaayo, 30.10.1977.

L. 619/Bis